



# Laga bilaabo 10 ka Nofeembar (november) waxaa lagu boorrinayaa dhammaan dadka deggan gobolka Västerbotten in ay:

**Ka baaqsadaan la kulanka dadka kale oo aan ahayn dadka ay wada nooly-  
ihiin, haddii ay suurogal tahay.** Waxaa sidoo kale lagala talinayaan in ay qabtaan  
ama ka qayb galaan xaflado, kulan saaxiibtinimo, isu soo bax iyo wixii la mid ah.  
Sidoo kale waa in ay ka fogaadaan ka qayb qaadashada hawl-wadareedka, haddii  
aanay suurogelayn in la fuliyo iyadoon la wada joogin. Tusaale ciyaaraha (isboor-  
tiga), jirdhisca ama isqurxinta aan loo samaynayn arrin caafimaad dartiis. Kula-  
madda lagama maarmaanka ah sida, daryeelka iyo baaritaanka caafimaad ma  
khusayso tala-bixintaan.

**Ka baaqsadaan in ay tagtaan goobaha hawada xiran leh,** sida dukaamada,  
goobaha ganacsiga, madxafyada, maktabadaha, goobaha dabbaasha och xaru-  
maha jirdhisca. Booqashada daruuriga ah ee dukaamada cuntada iyo farmashiy-  
asha ma khusayso.

**Ka baaqsadaan inay ka qayb qaataan shirarka,** bandhigyada, Riwaayadaha,  
kulamadda jirdhisca, cayaaraha iyo tartanadda. Arrinkani ma khuseeyo jirdhisca  
ilmaha iyo dhalinyarada dhalatay 2005 tii iyo ka gadaal.

**Ka baaqsadaan safarada aan daruuriga ahayn.** Safarada gobolka gudahiisa  
ama goboladda kale waxa ay ka qayb qaadan karaan faafitaanka cudurka, maa-  
daama uu qofku la kulmayo dad cusub. Taas oo sasab u noqon karta abuurida  
hab cudur faafineed cusub. Sidaas darteed waa in uu qofku ka baaqsado safarka  
haddii ay macquuls tahay. Tala bixintan ma khusayso dadka u safraya shaqada,  
waxbarashada iyo daryeelka caafimaad ee la rabo qofku in uu yimaado goobta.



[1177.se/skarpta-rad-vasterbotten](http://1177.se/skarpta-rad-vasterbotten)